

Waa maxay sababta aad u dooraneyso dugsiiga sare ee dawlada?

Macluumaad loogu talagalay xaanneeyayaasha iyo waalidiinta



Dugsiyada sare ee dawlada waxay u diyaariyaan dhalinyarada inay helaan nolol qof weyn oo buuxda ayna ku qancaan, iyo inay maareeyaan loolanka aduunkan casriga ah.

Barida iyo barashada tayada leh

Dugsiyada ku jira nidaamka waxbarashada dawlada ee NSW waxay isticmaalaan NSW Quality Teaching Framework (waa nidaam wax barid, barasho iyo qiimeyn waxqabad oo kor u qaadaya natiijoyinka barashada ee ardeyda) si ay u siiyaan barashada iyo barida leh ka qaybgelinta, la xirriirta ee loolanka leh. Macalimiintayadu waa kuwo si buuxda u tababaran oo aqoonsi waxbarasho sare leh. Dugsiyadayada waxay sidoo kale leeyihiin isticmaalka la taliyayaasha takhasuska leh oo siinaya tallo iyo tababaro macalimiinta si joogta ah si loo hubiyo in barideena iyo barashadeenuba fasalku ay baaqi ku ahaato heerka ugu sareeya.

Fursadaha manhajka oo ballaaran

Dugsiyada sare ee dawlada ee NSW waxay siiyaan ardeyda maadooyin aad u ballaaran, fursado iyo khibrad aqooneed. Iyadoo u marsiinaya fursadaha tababarada waxbarashada mihnadeed, ardeydeenu ma bartaan oo keliya maadooyin fara badan, waxay sidoo kale isticmaali karaan koorsooyin kala duwan, oo ay badidoodu bixiyaan iyadoo layskaashanayo machadka TAFE. Ardeyda sare waxay sidoo kale baran karaan maadooyin la heer ah kuwa jaamacada oo la xirriira HSC (Shahaadada aad ku heshay dhameynta aad ku guuleysatay shuruudaha koorlada Year 11 and 12). Dugsiyo badan oo ku yaal meelaha baadiyaha ah waxay isticmaalaan xirriir kumbiyuutar si ay u bixiyaan maadooyin dheeraad ah.

Qiimayaal xoog leh

Dugsiyada sare ee dawlada ee xaafadaada wuxuu sii wadayaa qiimayaasha muhiimka ah ee waxbarashada ka bilaaman tahay dugsiyada hoose dhexe ee ilmahaaga. Waa lagama maarmaan in ardeydeenu fahmaan muhimada xushmada, masuuliyada, wadajirka, ugu ficnaanta, maskax furnaanta, wadashaqeynta, ka qaybgalka, daryeelka, caddaalada iyo diimoqraadiyada. Sidaan, waxaan ka caawin karnaa ilmahaagau inuu:

- yeesho jacmaan waxbarasho
- raadiyo ugu ficnaan iyo heerar sare
- sameeyo daryeel iyo xushmad nafsadooda iyo kuwa kaleba
- la weynaato shaqadoodu
- soo bandhigo dareen xooggan oo caddaalad leh iyo caddaalada bulshodeedba
- ku faraxsanaando taariikhda Australia iyo bulshada dhaqamada badan
- si firfircoon uga qayb galaa muwaadin ahaan

Adeegyo taageero oo wanaagsan

Mid ka mid ah waxyaalaha ugu xooggan ee nidaamka dugsiga dawladu waxaa weeye dad aad u badan oo ka shaqeynaya si ay u hubiyaan in ilmahaagu si guul leh uu kula qaybsado jowiga dugsigiisa cusub. Adeegyada ballaaran ee taageero ee caawinaya ardeydu inay maareeyaan isbedelkooda dugsiga sare waxaa ka mid ah:

- la talliyayaasha ardeyda
- la talliyayaasha shaqada
- kooxaha wanaaga ardeyga
- la talliyayaasha dugsiga oo aqoon leh
- taageerada macalimiinta ee ardeyda leh dhibaato waxbarasho
- macalimiinta ardeyda Ingiriisku yahay afkoodii labaad
- caawiyayaasha waxbarashada Aboriginalka
- saraakiisha la shaqeynta iyo macluumaadka bulshada

Xoog saarida sannadaha dhexe ee (Years 5 - 9)

Caawinta ardeyda 'fasaladooda dhexe' ayaa la aqoonsadey inay leedahay ahmiyada ugu sareysa waxbarashada dugsiyada dawlada oo dhan ee ku yaal NSW. Dugsiyadu waxay sameysteen barnaamijyo fasalada dhexe ah oo aad loogu guuleysto si ay u hubiyaan u soo wareega ardeyda iyo waalidiinta dugsiga sare inay ahaato mid sahlan oo ay ka helaan ilaa intii suurto gal ah.

Natiijooyinka waxbarashada sare, barashada iyo barida tayada leh, fursadaha manhajka oo ballaaran, qiimayaasha xoogga leh, adeegyo taageero oo wanaagsan iyo xoog saarida fasalada dhexe – lix sababood oo wanaagsan oo aad u qorayso ardeygaaga dugsiga sare ee dawlada.

Adeega turjubaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay turjubaan kaa caawiya si aad ula xiriiro maamulahaaga, fadlan wac Adeega Turjubaanka Taleefanka taleefankan ah 131 450 kuna weydiiso turjubaan afkaaka ah. Turjubaanka ayaa wacaya maamulaha oo khadkana ku jiraya si uu kaaga caawiyo hadalkaaga. Adeegan wax lacag ah lagaa qaadi mayo.

NSW Department of Education

GPO Box 33
Sydney NSW 2001
T 9561 8000



Education
Public Schools